



Hadii aad maqashaan aadaanka, dhaha waxa mu'adinku dhahayo

Abii Saciid Alkhudri Allaah ka raali ahaade wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay inuu yiri:
"Hadii aad maqashaan aadaanka, dhaha waxa mu'adinku dhahayo".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu naxariis iyo nabadi korki ha ahaatee wuxuu ku boorinayaa Ummadda, inay ajiibaan mu'adinka markay aadaanka maqlaan, waana inaan ka daba dhahno wuxuu leeyahay, ereyba erey. markuu takbiirsado waan ka daba takbiirsanaynaa, markuu labada ashahaado dhahayo, waan ka daba dhahaynaa. Waxaa laga soo reebay ereyada (xaya cala salaat, xaya calal-falaax) oo macnohoodu yahay: u kaalaya salaada, u kaalaya kheyrka, labadaa waxaa la dhahayaa: laa xawla walaa quwata ilaa billaah.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3013>

